

Racfaanka wakaalada gobolka, macmiilu waa inuu muujiyaa in goysmada la soo-jeediyey ay laba siyaabood u wax-yeelaynayso caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka helaha adeegyada:

1. Caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka helaha adeegyada waxa waxyeelayn doona goysmada la soo-jeediyey.
2. Caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka helaha adeegyada waxa waxyeelayn doona miisaaniyada taala haddii heluhu uu doorto inuu ku helo adeegyada sida caadiga ah ee dhaafitaanka Naafonimada Korriinka.

Shaqada Degmada “County”:

Waa shaqada degmada inay hubiso in adeegyada lagama maarmaanka ah ee caafimaadka ay buuxiyaan iyo daryeelka Caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka helaha adeegyada. Minn.Stat.§ 256B.092 Subd. 5(c) (2004).

Maareeyaha kiisku waa inuu u huro inuu la kulmo helaha adeegyada ama wakiilkiisa si uu ugala hadlo sidii loo buuxin lahaa baahida helaha iyada o la raacayo dhaafitaanka caadiga ah. Minn.Stat.§ 256B.02 Subd. 5(c) (2004).

Heerka Laga Rabo U-qalmanaanta Adeega:

Muxuu yahay heerka la rabo in lagu qanciyo Garsooraha in adeegyada qorshahan yaalaa inuu buuxiyo baahida caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka adeeg helaha?

Adeeg heluhu waa inuu:

1. Lahaado naafonimo korriin ama xaalad la xidhiidha;
2. Maalin kasta u baahan yahay dhexgal, kormeer iyo gargaar joogta ah si uu u barto xirfadaha daruuriga ah;
3. Gargaar u bahan yahay lagu hubinayo caafimaadka iyo daryeelka si loo buuxiyo baahidiisa qof ahaaneed; iyo
4. Inuu halis u yahay in la geeyo ICF/MR si uu u helo adeegyada loo baahan yahay haddii bulshadu aanay taageerada siinayn.

ICF/MR waa meelo la deggan yahay oo bixiya daryeel 24-saac ah, kormeer iyo adeegyada daryeelka joogtada ah ee nololaha. Adeegyada ICF/MR waxa lagu bixiyaa meelo qiyaas ahaan kala duwan oo laga yaabo in ay wadaan bixiyayaal gaar ah ama dadweyne.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.